# Guul u soo hooyatay Ku-dhaqanka Sharciga ee Somaliland

## *Maxkamadda Rafcaanka ee Berbera oo Taageertay Xukun Kufsi ah*

**War Saxaafadeed: 11 April 2019**

10kii April 2019, Maxkamadda Rafcaanka ee Gobolka Saaxil, ee fadhigeedu yahay Berbera, Somaliland ayaa taageertay xukun kufsi ah oo 7-sanno lagu xukumay. Maxkamaddu waxay ogaatay in dhibanaha kiiskan la kufsaday kadib markii ay aqbashay in ay raacdo gaadhiga danbiilaha.

Goobaha miyiga ee Somaliland, halkaas oo ayna jirin gaadiidka dadweynaha u adeegaa, dumarka intooda badan waxa ay ku khasban yihiin in ay raacaan gawaadhida dadka ayna garanayni wataan si ay u gaadhaan goobta ay rabaan. Is amminaadda, oo ku dhisan xidhiidhka adag ee bulshada ka dhexeeya ayaa u suurtagaliyey in dumarku inta badan ayna dhibaato arrintan kala kulmin. Laakiin gabadhan yari may ahayn mid nasiib badan. Kadib markii ay raacday gaadhiga danbiilaha falkan geystay, waxa ay sheegtay in uu wadada kala baxay, kufsaday, kadibna kaga tegay goob cidlo ah oo wadada dhinaceeda ah. Nasiib wanaag, muddo yar kadib waxa ay u gacan haadisay gaadhi wadada marayey kaas oo ay ka codsatay in uu qaado isla markaa ka daba geeyo gaadhiga ninkii falka kufsiga ah u geystay. Wuu ka aqbalay wuxuuna digniin u diray ciiddanka jooga goobaha gaadiidka lagu baadho ee magaalada Berbera laga soo galo iyo Ciidanka Booliska ee Berbera. Dhibanihii waxa ay gudbisay warbixinteedii ninkii falka geystayna waa la soo xidhay waxayna Maxkamadda Gobolka ee Berberi ku xukuntay todoba sanno oo xadhig ah 10kii March 2019.

Maxkamadda Rafcaanka ee Saaxil, ee taageertay xukunkan kufsiga, waxa ay go'aankeeda soo saartay dhawr usbuuc uun kadib markii garsoore jooga caasimadda Hargeysa uu sifo sharci-darro ah ugu xukumay dhibane loo geystay kufsi in laga jaro 100 jeedal. Maxkamad ka darajo sarreysa ayaa laashay xukunkaas, balse waxa ay dhab ahaan ka soo horjeedaa xukunka ay gaadhay maxkamadda rafcaanka ee Gobolka Saaxil. Dhibane loo geystay kufsi in lagu xukumo 100 jeedal waxa ay ka baxsantahay dadnimada. Sidoo kale waxa ay gef ku ahayd ku-dhaqanka sharciga; waxa ay ahayd danbi ciqaabeed kiis madani ah xukunkuna muu ahayn mid waafaqsan xeerarka Somaliland. Xukunka ay gaadhay Maxkamadda Rafcaanka ee Gobolka Saaxil waxa uu tusaale u yahay sida nidaamka caddaalad ciqaabeedka Somaliland, marka uu u hogaansamo xeerarka, uu u illaalin karo danaha dhibanaha.

6th Floor Omar Hashi Building, Hargeisa, Somaliland | +252 523 603 +252 (0) 633 751 063
P.O. Box 691-00621 Nairobi, Kenya | +254 (0) 20 4180 222 +254 (0) 713 773 420
www.thehorizoninstitute.org | info@thehorizoninstitute.org

Go'aanka xukunka ee 10kii April waa guul u soo hooyatay ku-dhaqanka sharciga. Midhahaas oo dhab ahaantii ahaa kuwo la hubay in ay soo baxayaan. Waxa jira in dadku si aad ah ugu xaglinayaan ku dhaqanka xeer-dhaqameedka marka laga hadlayo xallinta kiisaska kufsiga. Haddii qoysaska dhibanaha iyo danbiiluhu ay arrimahooda ku dhammaystaan dibadda, inta badan xeer-ilaalintu way joojiyaan kiiskooda. September 2014, Xeer Ilaaliyaha Guud, Xasan Axmed Aadan, ayaa qaaday tallaabo lagu horumarinayo hannaanka caddaalad ciqaabeedka ee la xidhiidha sida loo maareynayo kiisaska kufsiga. Waxa uu soo saaray amar qeexaya in xeer-ilaaliyeyaashu ayna aqbali karin heshiisyada ku sallaysan xeer-dhaqameedka marka laga hadlayo kiisaska kufsiga. Laakiin amarkan inta badan lama raacin.

Markii *Hay'adda Horizon Institute,* oo bixisa adeegga kaalmada sharci iyada oo adeegsanaysa barnaamijka kalkaaliyeyaasha sharcigu, ay billawday taageerada dhibanahan ee magaalada Berbera, waxa laga wada hadlayey sidii arrintan loogu xallin lahaa xeer-dhaqameedka. Kalkaaliyeyaasha Sharciga ee *Horizon* waxa ay digniin u direen Xeer-ilaaliyaha Guud iyaga oo uga digaya culayska lagu hayo dhibanaha iyo qoyskeeda sidii ay u aqbali lahaayeen xallinta arrintan iyada oo la marayo hannaanka xeer-dhaqameedka, culaysyadaas oo qaar kood ka imanayeen bahda caddaaladda dhexdeeda, taas oo xadgudub ku ah amarkii Xeer-Ilaaliyaha Guud. Xeer-Ilaaliyaha Guud tallaabo degdeg ah ayuu qaaday waxaanu xaqiijiyey in Xeer-ilaalintu ayna ka laabanayn kiiskan.

Marka la isku daro *Hay'adda Horizon oo* sii waday in ay u dooddo dhibanaha isla markaa ay taageero u fidiso iyada iyo qoyskeedaba, dedaalka uu muujiyey Xeer-Illaaliyaha Guud ee uu ku taageeray ku-dhaqanka sharciga, dhiiranaantii iyo adkaysigii dhibanaha iyo qoyskeeda intaas oo la isku daray waxa ka dhashay in Maxkamaddii Rafcaanku taageerto go'aankii ay Maxkamadda Darajada koowaad gaadhay.

Somaliland waxa ay leedahay xeer fal-danbiyeed ku qaada cidda geysata kufsiga isla markaa xaqiijiya in dhibaneyaasha kufsigu helaan caddaalad. Marka la sameeyo dedaalka lagu ilaalinayo ku-dhaqanka sharciga, waxa sidoo kale la dhawrayaa danaha dhibanaha. Kooxdii difaacu waxa ay sheegeen in ay rafcaan ka qaadanayaan xukunka 10kii April una gudbin doonaan Maxkamadda Sare. *Hay'adda Horizon* waxa ay sii wadi doontaa in ay taageero u fidiso dhibanaha isla markaa si dhaw ula socoto kiiskan si ku-dhaqanka sharcigu u ahaado mid sarreeya.

*Horizon Institute waa* Hay'ad aan Dawli ahayn oo ka hawlgasha Somaliland. *Horizon* waxa ay xuquuqda aadanaha u baddeshaa ficil iyada oo fullisa mashaariic ku dhisan xog, daraasad iyo falanqayn lagu samaynayo arrimaha muhiimka ah ee saameynta ku leh bulsha ay u fidinayso adeegyada. Hawsha *Horizon* waxa udub-dhexaad u ah ballanqaad xooggan oo ku saabsan sidii loo horumarin lahaa xuquuqda aadanaha iyo ku-dhaqanka sharciga.

Si aad wax badan uga ogaatid hawlaha ay qabato, booqo: www.thehorizoninstitute.org